



Ogeysiin Muhiim ah oo laxiriirta codsashada codsiyada ee Badbaadinta

Hoosaad oo Codsadavaasha Sharciga Qaxootiga.

1. Sida waafaqsan Maxkamada Cadaalada Midowga Yurub oo xukumayo hadii ay H. N. v. Wasiirka Cadaalada, Sinnaanta iyo Sharci Dajinta, Ireland iyo Xeer ilaaliyaha Guud, Midowga Yurub (Badbaadinta Hoosaad) Sharciyada 2013 (S.I. No. 426 oo 2013) waa la bedelay.
2. Midow Yurub (Badbaadinta Hoosaad) (Bedelka) Xeerarka 2015 (S.I. Lam. 137 oo 2015) siiya qoraal sharci oo bilaaba abaabulada xiga oo u hogaansan xukunka Maxkamada:
 - Qof walba oo sameeyo codsi cusub oo sharciga qaxootiga ah wuxuu sidoo kale sameyn karaa codsi badbaadin hoosaad ah oo Wakiilka Xafiiska Codsiyada Qaxootiga (ORAC).
 - Qof walba oo hadeer sugayo codsiga sharciga qaxootiga wuxuu sidoo kale ka sameyn karaa codsiga badbaadinta hoosaad ORAC,
3. Codsiyada noocaas ah oo badbaadinta hoosaad ah waxaa go'aansanayo ORAC sida waafaqsan xeerarka Midowga Yurub (Badbaadinta Hoosaad) Xeerarka, 2013 (S.I. No. 426 of 2013)(sida loo bedelay) iyo waa la baarayaa hadii codsiga sharciga qaxootiga uu diido Wasiirka Cadaalada iyo Sinnaanta.
4. **Waxa la sameynayo daboolida Xeerarka 2015?**

Hadii aad tahay codsade cusub oo badbaadinta hoosaad ah:

Xeerarka 2015 wuxuu sheegayaa in qofka sameeyo codsiga cusub oo sharciga qaxootiga ah wuxuu sidoo kale sameyn karaa codsi ah badbaadinta hoosaad kaas oo la baarayo iyo go'aansanayo Guddiga hadii codsiga qofka ee sharciga qaxootiga uu diido Wasiirka Cadaalada iyo Sinnaanta. Sidaas darteed, Guddiga ayaa markaas, sida waafaqsan Xeerka 2013 (sida lagu bedelay) iyo waxaa xiga wareysiga codsiga badbaadinta hoosaad, diyaari wargelin qoran oo la xiriirta baaritaanka codsiga. Guddiga wuxuu talo u sameynayaa Wasiirka Cadaalada iyo Sinnaanta sida hadii codsadaha uu yahay qof xaq u leh badbaadinta hoosaad.

Hadii aad tahay codasade horay u jiray oo badbaadinta hoosaaad ah:

Xeerarka 2015 wuxuu sheegayaa in qofka hadeer ka maqanyahy codsiga oo sharciga qaxootiga ah wuxuu sidoo kale sameyn karaa codsiga badbaadinta hoosaaad kaas oo la baarayo iyo uu go'aansanayo Wakiilka hadii codsiga qofka ee sharciga qaxootiga uu diido Wasiirka Cadaalada iyo Sinnaanta. Sidaas darteed, Guddiga ayaa markaas, sida waafaqsan Xeerka 2013 (sida lagu bedelay) iyo waxaa xiga wareysiga codsiga badbaadinta hoosaaad, diyaari wargelin qoran oo la xiriirta baaritaanka codsiga. Guddiga wuxuu talo u sameynayaa Wasiirka Cadaalada iyo Sinnaanta sida hadii codsadaha uu yahay qof xaq u leh badbaadinta hoosaaad.

5. Xaaladaan noocyada dadka kor lagu sheegay, codsiga badbaadinta hoosaaad waxaa lagu sameyn karaa iyadoo la gudbinayo Foom buuxa oo ORAC ah SP/04 [Codsiga waafaqsan Xeerka 3A(1) oo Midowga Yurub (Badbaadinta Hoosaaad) Xeerarka 2013 (sida lagu bedelay) oo ku dhawaaqida badbaadinta hoosaaad], midkood

- qof ahaan ah Office of the Refugee Applications Commissioner, Timberlay House, 79-83 Lower Mount Street, Dublin 2,

AMA

- boosto ahaan ah ORAC Customer Service Centre, Timberlay House, 79-83 Lower Mount Street, Dublin 2.

6. Marka aad codsatid Badbaadinta Hoosaaad waxaad sheegi kartaa warbixin dheeraad ah adigoo buuxinayo foomka ORAC SP/05 (Warbixinta dheeradka ah oo la xiriirto codsiga waafaqsan Xeerka 3A(1) oo Midowga Yurub ah (Badbaadinta Hoosaaad) Xeerarka 2013 (sida lagu bedelay) oo ku dhawaaqida badbaadinta hoosaaad) iyo u gudbinta cinwaanka kore. Warbixin dheeraad ah waxaa la siin karaa Wakiilka xili walba oo ka bilaabaneyso taariiqda codsiga ilaa taariiqda dhacida oo 15 maalmood shaqo ah oo taariiqda Wasiirka uu diro ogeysiinta diidmada ku dhawaaqida sharciga qaxootiga.
7. Xeerarkan 2013 iyo 2015 waxaa si buuxda looga heli karaa websaydka Wakiilka Codsiyada Qaxootiga ee <http://www.ORAC.ie>.

Xafiiska Wakiilka Codsiyada Qaxootiga

20 April 2015